

## Cudurka Legionnaires

### Waa maxay cudurka Legionnaires?

- Cudurka Legionnaires' waa nooc halis ah oo sambabada sambabada gala (caabuqa sambabada) oo ay keento bakteeriyada *Legionella*.
- Bakteeriyada waxaa si dabiici ah looga helaa iyada oo heerar hoose ah deegaanka biyaha macaan, laakiin waxay khatar ku yihiin caafimaadka bini'aadamka marka ay kobcaan oo ay faafaan iyaga oo ka dhasha hababka biyaha ee bani'aadamku sameeyo.
- Cudurka Legionnaires waxaa magac loogu bixiyay markii uu dillaacay ee ugu horreysay ee la aqoonsaday cudurka ee sanadkii 1976 dii shirweynihii Legion American ee lagu qabtay Philadelphia.

### Sidee buu u faafaa?

- Cudurka Legionnaires wuxuu ku faafaa dhibcaha biyaha ee hawada la socda ee ay ku jiraan *bakteeriyada Legionella*.
- Bakteeriyada waxaa faafin kara aaladaha abuura hawada biyuhu la socdaan sida qubeyska biyaha kulul la isku uumiyo (hot tubs), qubayska, ilaha biyaha qurxinta (decorative fountains), iyo xarumaha la isku qaboojiyo.
- Dadku cudurka ayey ka qaadi karaan haddii ay neef ahaan u qaataan neef ay la socoto dhibco biyo ah oo ay ku jirto bakteeriyada.
- Cudurka Legionnaires kuma faafayo marka dadku jirkooda is taabto.

### Yaa khatar ugu jira?

- Dadka halista sare ugu jira infekshanka waxay isugu jiraan kuwa da'doodu tahay 50 sano ama ka weyn iyo kuwa hadda ama horay sigaarka u cabi jiray.
- Waxyaabaha kale ee khatarta ah waxaa ka mid ah qabitaan xaaladaha caafimaad ee daba

dheeraada sida cudurada sambabada, kelyaha, ama beer xanuunka, sonkorowga, kansarka, iyo xaaladaha caafimaad iyo daawooyinka saameeya habdhiska difaaca jirka.

### Maxay yihiin calaamadaha lagu garto?

- Calaamadaha guud ee lagu garto waxaa ka mid ah:
  - Qandho
  - Qarqaryo
  - Qufac
  - Neefta/Naqaska oo yaraata
  - Madax xanuun
  - Murqo xanuun
  - Daal
- Calaamadaha kale waxaa ka mid noqon kara shuban, lallabbo, cunto xumo, daciifnimo, iyo jahwareer.
- Calaamaduhu waxay badanaa soo if baxaan 2 ilaa 14 maalmood kadib marka ay bakteeriyada qofka gaartay.

### Sidee loo baaraa ?

- Calaamadaha cudurka Legionnaires waxay aad ula mid yihiin noocyada kale ee oof wareenta (nimoonyada).
- Qofka oo la saaro Raajada laabta iyo baaritaanka *Legionella*, oo sida badan lagu baaritaanka antigen-ka kaadida, ayaa ah sida ugu badan ee lagu ogaado cudurka Legionnaires.

### Sidee loo daaweeyaa?

- Haddii aad leedahay calaamadaha cudurka oof wareenta (nimoonyada), waxaa muhiim ah inaad isla markiiba aragto daryeel caafimaad bixiye. Cudurka Legionnaires' waxaa lagu daaweeyaa antibiyootiko.

- Kiisaska badankoodu waxay u baahan yihiin cisbitaal in qofka la dhigo qaarna waxay u baahan karaan daryeelka degdega ah (intensive care) ah. Qiyaastii 1 qof ayaa 10kii qof ee kasta ee uu ku dhaco cudurka Legionnaires ayaa u dhinta cudurka.
  - Qaboojiyayaasha guryaha iyo kan baabuurka ma isticmaalaan biyaha si ay hawada u qaboojiyaan, markaa wax khatar ah uguma jiraan koritaanka *Legionella*.
  - Furaha ka hortagga cudurka Legionnaires waa in la yareeyo khatarta koritaanka *Legionella* iyo faafitaanka marka la dhisayo nidaamyada biyaha iyo qalabkooda iyada oo loo marayo xeelado dayactir oo wanaagsan. Xeeladahan waxaa ka mid ah la socodka heerkulka biyaha iyo heerarka jeermiska dila iyo ka hortagga xaaladaha biyaha fadhiya.
  - Mulkiilayaasha iyo maareeyayaasha dhismayaasha waa in ay sameeyaan oo ay hirgeliyaan barnaamijka maaraynta biyaha iyaga oo isticmaalaya heerarka ASHRAE (American Society of Heating, Refrigerating and Air-Conditioning Engineers [Kooxda Ingineerada Maraykanka ee Kuleyliyaha, Qaboojiyaha iyo Qaboojiyaha Hawada]).
- Iyadoo ku xiran xaaladaha deegaanka, noolaha *Legionella* wey ku tarmi karaan kuna faafi karaan noocyo badan oo hababka biyaha sii daaya ee bini'aadamku sameeyo sida qubeyska biyaha kulul la isku uumiyo (hot tubs), madaxyada qasabada qubeyska, qasabadaha saxanka faraxalka, ilaha biyaha qurxinta (decorative fountains) iyo biyaha jardiinooyinka lagu qurxiyo, haamaha biyaha kulul iyo kuleyliyayaasha, nidaamyada tuubooyinka waaweyn howshoodu culus tahay, iyo xarumaha la isku qaboojiyo. (qaab-dhismeedyada ay ku jiraan biyaha iyo marawaxada oo loo isticmaalayo hababka qaboojinta ee dhismaha ka dhexeeya ee dhismayaasha ama warshadaha wax sameeya).

Minnesota Department of Health  
Waterborne Diseases Unit  
PO Box 64975  
St. Paul, MN 55164  
651-201-5414  
[health.water@state.mn.us](mailto:health.water@state.mn.us)  
[www.health.state.mn.us](http://www.health.state.mn.us)

01/2024

*Si aad xogtan ugu hesho qaab sidaan ka duwan, wac: 651-201-5414.*